



Xaashida Xaqiiqda Evusheld: Dhaqan-galka dheer ee kooxda unugyada difaaca ee isku nooca ah ee ka-hortagga COVID-19

(Loogu talagalay Bukaana, Waalidiinta & Daryeel-bixiyeyaasha)

S: Waa maxay Evusheld?

Evusheld waa daawaynta kooxda unugyada difaaca ee isku nooca ah (mAb). Waxa loo isticmaalaa in lagaga hortago caabuqa COVID-19 ee dadka aan la garanayn in uu cudurkani la kulmay.

S: Sidee loo maamulaa Evusheld?

Evusheld waxa la isku siiya laba irbadood ahaan oo isla ballankoo ah Hal tallaal ayaa inta badan lagu duraa muruq kasta oo gluteal ah.

S: Yaa heli kara Evusheld?

Evusheld waxaa loogu talagalay:

- Dadka waweyn iyo kuwa qaangaarka ah ee jira 12 sano iyo ka weyn oo miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol (40 kg),
- Kuwaas oo aan hadda qabin COVID-19 oo aan dhawaan la ogayn inuu xiriir dhow la yeeshay qof cudurka qaba, iyo cidda
 - Leh xal difaac oo dhexdhexaad ah-ilaal-mid daran xaalad caafimaad awgeed ama dawooyinka difaaca jirka ama daawaynta, ama
 - Anu heli karin tallaalka COVID-19 iska-hor-imaad caafimaad awgeed.

S: YAANAN helaynin Evusheld?

Evusheld waa in aan la siin dadka qaba xasaasiyad daran kana qaada maaddo kasta oo ku jirta. Kahor intaadan qaadan Evusheld, kala hadal bixiyahaaga xanaanada caafimaadka haddii aad:

- Qabto xasaasiyad
- Qabto cillad dhiigbax
- Qabto Wadna xanuun
- Qabto jirro kale oo halis ah
- Uu kugu dhacay xanuunka dimirka
- Naas nuujinayso

- Qaadato daawada dhiiga khafiifisa
- uur leedahay
- Aad qaadanayso daawooyin kale, oo ay ku jiraan kaabista
- uur yeelan karto

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.